



## **Barnaamijka Caawimada Dhaqaalaha**

### **Su'aalaha & Jawaabaha iyo Macluumaadka ay tahay inaad Ogaato**

#### **Ma caawin kartaa caddaynta nidaamka codsiga?**

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan nidaamka ama u baahan tahay kaalmada fahanka qayb kasta oo nidaamka codsiga ah, fadlan la xidhiidh xubinta kooxdayda Adeega Macmiilka lambarka (800) 639-2719.

#### **Caawimo ma ka heli karnaa dhammaystirka codsigayga?**

Haa Fadlan kala xidhiidh Adeega Macmiilka lambarka 847-8000 ama 1-800-639-2719 wixii su'aalo ah ama iimayl noogu soo dir CustomerService@UVMHealth.org. Haddii aad jeclaan lahayd inaad la hadasho Qareenka Maaliyada ama La taliyaha goobtayada cinwaanka hoos ayay ku qoran tahay. Shaqaalaha xaga Barnaamijka Kaalmada Caafimaadka sidoo kale waxaa loo heli karaa si laguula kulmo adiga si loo buuxiyo codsiga. Fadlan ka soo wac iyaga 802-847-6984 si ballan loo qabsado.

#### Central Vermont Medical Center

Financial Advocacy  
3 Home Farm Way  
Montpelier, VT 05602  
(802) 371-4600 Option 1

#### Porter Medical Center

Financial Counseling  
23 Pond Lane  
Middlebury, VT 05753  
(802) 388-8808

#### University of Vermont Medical Center

Financial Advocacy  
111 Colchester Ave  
Burlington, VT 05401  
Main Campus, ACC Diiwan gelinta  
(802) 847-1122

#### **Haddii su'aal ama qayb aanay aniga igu habboonayn, iyaddoo banaan ma ka tagi karaa?**

Maya. Waxaan u baahanahay codsiga dhammayska tiran marka la codsanayo kaalmada maaliyada. Haddii qayb ama su'aal aanay ku habboonayn, qor N/A wixii aan ku habboonayn.

#### **Haddii aanan haysan dhammaan caddaynta la codsaday. Ma diri karaa waxa aan haysto?**

Maya. Waa inaad soo celiso codsiga buuxa ee wata dhammaan caddaymaha habboon, ama codsiga waala diidi doonaa ilaa caddaymaha taageeraya la soo gudbiyo. Haddii aad qabto su'aal ku saabsan dhokumenti gaar ah, fadlan soo wac waaxdayada adeega macmiilka lambarka (800) 639 2719, waxaa jiri karta dhokumenti kale oo la beddeli karo.

#### **Ma hubo haddii aan u qalmo Medicaid, NY Family Health Plus ama barnaamijka caymiska kale ee uu maalgeliyo Gobolku, ma iga caawin kartaa go'aaminta haddii aan u qalmo?**

Haa, fadlan la xidhiidh qareenadayada maaliyada ama la taliyayaasha ururka cusbitaalka habboon ee sare si loo qabto kullaan ama baadhitaan sida loogu baahdo.

## **Waa maxay warqadda xaqiijinta dheeftu?**

Haddii aad helayso dheefaha amniga bulshadda (SSI), tani waa warqadda sanadlaha ah ee amniga bulshaddu soo diro oo kugu wargeliyo dheefahaaga loo qalmo ee bilaha ah. Ujeedooyinka xaqiijinta waxaanu aqbali doonaa warqadda abaal marinta dheefta. Si loo helo koobiga Warqaddaada Xaqiijinta dheefta, booqo [www.ssa.gov/myaccount/](http://www.ssa.gov/myaccount/)

## **Waxaan diray, W2 kayga marka aan dib u helay codsigayga anoo waydiisanaya Cashuur celintayda Federaalka. Sababtee?**

Waxaa jira faraq u dhexeeya W-2 kaaga iyo Cashuur celintaada Federaalka W-2 si fudud waa warbixinta waxaad shaqaysato ee ka timid loo shaqeeyahaaga gaarka ah. Cashuur celintaada Federaalka waa diiwaanka buuxda ee wadarta dakhligaaga. Waxaanu u baahanahay Cashuur celintaada Federaalka oo buuxda. W-2 looma isticmaali karo beddel oo kale. Haddii aanad haysan koobiga Cashuur celintaada Federaalka la xidhiidh Adeega Dakhliga Gudaha (IRS) lambarka 1-800-908-9946 oo codso Qoraalka Cashuur celinta oo aan kharash lahayn ama booqo [www.irs.gov/Individuals/Get-transcript](http://www.irs.gov/Individuals/Get-transcript)

## **Sanadkee Cashuur celintayda Federaalka ayaan soo diraa?**

Bixi buuxintii cashuurta ee ugu dambaysay - ka dib 15keeda.

## **Loo shaqeeyahaygu ma bixiyo warqaddaha mushaharka lagu bixiyo, maxaan sameeyaa?**

Haddii warqaddaha mushaharka lagu qaato aanu bixin loo shaqeeyahaagu. warbixinta qoran ee cinwaanka warqadda ka saraysa ee shirkada aad u shaqayso ayaa la aqbali doonaa. Warbixinta qoran waxay muujiysaa wadarta mushaharka, jarjarida, iyo mushaharka go'an ee hal bil ah. Fadlan ogow, haddii aad xaas tahay ama aad leedahay lamaanaha guriga, caddayntiisa / teeda sidoo kale waa loo baahan yahay. Shaqaalaha muhaajiriinta ah, koobiga qandaraaskaaga ama warqadda ka soo baxday loo shaqeeyahaaga waa la aqbali karaa.

## **Ma dhammaystiro macaashka saddex biloodlaha ah iyo khasaaraha ganacsigayga. Ma soo diri karaa Cashuur celintayda Federaalka hadda ah?**

Haddii aad tahay hantiilaha keliya ee iskiis u shaqaysta, Shuraakada, ama Shirkada, waxaad u baahan doontaa inaad nasiiso Cashuur celintaadii ugu dambaysay hadda (ay ku jirto jadwalada dhammaantood iyo foomamka) iyo macaashka saddex bilood laha ah ee sanadkan iyo warbixinta khasaaraha. Haddii aanad dhammaystirin macaashkaaga saddex biloodlaha ah iyo warbixinta khasaaraha, sanadahaagii hore P&L waa in lala soo gudbiyo Cashuur celintaada Federaalka. Haddii aad u buuxinayso Shuraako ama Shirkad waxaanu u baahan doonaa Cashuur celitan Federaalka, Cashuur celintaada Federaalka gaarka ah, oo ay la socoto Shuraako iyo/ama Shirkada Sanad ilaa Taariikhda, Macaashka Saddex biloodlaha ah iyo Khasaaraha ama sanadkii hore beddelka rubucaaga hadda.

## **Waa maxay muddada daboolida Kaalmada Maaliyada?**

Muddadaada daboolida waxaa lagu sheegi doonaa warqaddaada deeqda. Waxay ansax ahaan kartaa ilaa lix bilood, ilaa labba iyo toban bilood haddii qofka jira 65 ama ka wayn oo hawl gab yahay ama xaalada deeqda masiibada la bixiyo, waxay ansax ahaan kartaa dhacdo keliya oo daryeelka ah. Haddii dakhligaagu sheego waxaad u qalmi kartaa Medicaid, NY Family Health Plus ama barnaamijka caymiska caafimaadka kale ee uu Gobolku maalgeliyo, waxaa lagaaga baahan doonaa inaad codsato Medicaid haddii aad buuxiso shuruudaha u qalmida. Warqaddaada oggolaanshahu waxay sheegi doontaa muddada daboolida.

### **Intee jeer ayaan u baahanahay inaad dib u codsado Kaalmada Maaliyada?**

Kaalmada Maaliyada waa barnaamijka bukaanada wajahida xaalada adag ee dhaqaale oo waxaa kaliya la codsan karaa haddii aad hayso biilashada caafimaadka oo aanad ku bixin karin UVMHN. Waxaad codsan kartaa wakhti kasta haddii aad haysato hadhaayada aanad awoodin inaad bixiso, haddii aad filayso in kootada hadda caymiska ee aan la aqbalin ay ka tagayso hadhaa ama aad filayso adeega caafimaadka mustaqbalka la qorsheeyay ay hadhaa kaaga tegi doonto.